

U diyaargarow inaad is-diiwaangaliso oo aadna codeyso



**ELECTORAL
COMMISSION**
TE KAITIAKI TAKE KŌWHIRI

ROE47 A4 Somali 04/2026

Maxay tahay sababta aan iskugu diiwaangalinayo inaan codeeyo?

Haddii aad isku diiwaangaliso inaad codeyso, waxaad cod ku leedahay doorashooyinka guud, kuwa deegaan iyo wixii afti ah. Doorashoyinku waa fursadda aad ku dooran karto cidda kugu matalaysa Baarlamaanka ama golaha deegaanka ee arrimaha aad danayso.

Waxaad xaqiijin kartaa codkaaga in la maqlo adigoo isku diiwaangalinaya inaad codeyso.



Yaa is diiwaangalin karo oona codeyn karo?

Waxa waajib ah inaad is-diiwaangaliso haddii aad:

- tahay 18 sanno jir ama ka weyn tahay, iyo
- aad tahay muwaadin ama qof degan New Zealand oo codbixin kara, iyo
- ugu noolayd si joogta ah New Zealand 12 bilood ama wax intaas ka badan noolashaada.

Haddii aad si sharci ah ugu nooshahay New Zealand isla markaana aan lagaaga baahnayn inaad wadanka ka baxdo waqti cayiman markaas waxaad tahay qof codbixin kara. Kan waxaa ka mid ah cidda fiise degganaansho haysata.

Haddii aad tahay qof u dhashay Australia, jasiirada Niue, Tokelau ama Cook, waad is-diiwaangelin kartaa haddii aad si toos ugu nooleyd New Zealand 12 bilood ama wax badan.

Haddaad ku nooshahay qurbaha waxaad isku diiwaangalin kartaa inaad codayso haddii aad:

- tahay 18 sanno jir ama ka weyn tahay, iyo
- waqti ka mid ah noolashaada si joogto ah ugu nooleyd New Zealand in ka badan 12 bilood, iyo
- waxaad tahay labadan midkood: **muwaadhin New Zealand u dhashay iyo haddii aad ku nolayd New Zealand 3-dii sano ee la soo dhaafay, AMA inaad tahay qof daggan dalka oo codbixin kara oo aad ku noolayd New Zealand 12-kii bilood ee la soo dhaafay.**

Waad codsan kartaa inaad is-diiwaangeliso markaad 17 jirsato.

Markii aad gaartid 18, si otomaatig ah ayaa lagu diiwaangelinayaa waxaadna diyaar u ahaaneysaa inaad codeysid.



Iska diiwaangelinta inaad codeyso haddii aad tahay Māori

Haddaad tahay qof ka soo jeeda Māori oo aad isdiiwaangalinayso markii koowaad, waxaad doorataa heer-doorasheedka aad rabto inaad ku jirto: heerka guud ama heerka Māori.

Liiska doorashada aad ku jirto ayaa go'aamiya:

- goobta aad ka codeynayso
- musharaxyada aad kala dooran karto.

Haddaad horey isku diiwaangalisay, waad beddeli kartaa heerka aad ku jirto markii aad doonto, marka laga reebo:

- saddexda bilood ee ka horeeya doorashada guud ama doorashada deegaanka ee la qabto 3 sano kasta
- kahor doorashada buuxinta kursi baarlamaan oo bannaan haddii isbeddelku ku gaynayo goob-doorasheedka meesha doorashada kursiga bannaan laga qabanayo.

Muxuu doorashada heer-doorasheedku kaaga dhigan yahay?

Doorasho guud, haddii aad xulato liiska guud, waxaad u codeyn doontaa murashax doorasho guud ka qeybqaadanaya oo ka tirsan codbixiyeyaasha guud. Haddii aad dooratid liiska Māori, waxaad u codeyneysaa musharax ka tirsan Māori. Waxaad u codeyneysaa isla liiska xisbiyada siyaasadeed, liis walboo aad ku jirtid.

Heer-doorasheedka aad dooratid waxay saameyn kartaa cidda aad ugu codaynaysid doorashooyinka deegaanka. Haddii aad doorato heer-doorasheedka Māori, oo maamulka deegaankaaga leeyihiin waax ama degmo-doorasheed Māori ah, waxaad u codayn doontaa musharaxiin kujirto waaxda ama degmo-doorasheedka Māori. Haddaad doorato heer-doorasheedka guud, waxaad u codayn doontaa murashaxiinta ku jira waaxda ama degmo-doorasheedka guud.



Ma ka walaacsantahay badbaadadaada shaqsi ahaaneed?

Haddii aad ka walaacsantahay badqabkaaga shaqsi ahaaneed, ama midda qoyskaaga, waxaad codsan kartaa in lagugu daro liiska dadka loo oggol yahay inay codeeyaan ee qarsoodiga aana la daabicin. Waxaan ku hayneynaa macluumaadkaaga diiwaangelinta si badbaado ah oo qofna ma siineyno. Haddii aad ku jirto heer aan la daabicin, tafaasiishaada laguma soo dari doono heerka doorashada la daabacay kaman firin kartid waxna kagama beddeli kartid tafaasiishaada qaab onlayn ah.

Markaad codeyso waxaad ku khasbanaan doontaa inaad dhamaystirto codbixin gaar ah kadibna aad raaciso foom dheeraad ah warqadaada codbixinta si aad u xaqiijiso meesha aad ka diwaangeshan tahay inaad ka codbixiso. Booqo **vote.nz** ama soo wac **0800 36 76 56** wixii warbixin dheeraad ah iyo foomka codsiga.



Sideen isku diiwaangaliyaa?

Waa wax fudud inaad isdiiwaangaliso ama cusboonaysiiso macluumaadkaaga. Waxaad awoodaa:

- inaad iska diwaangeliso onlayn barta **vote.nz** adigoo isticmaalaya laysinkaaga darawalnimada ee New Zealand, baasaboorka New Zealand, aqoonsiga lagu xaqiijiyay RealMe
- waxaad bilaash ku wici kartaa **0800 36 76 56** oo aadna ka codsan kartaa in foom diiwaangalinee lagu soo diro.

Markii la buuxiyo, saxiix oo nagu soo celi foomka annaga. Markii aad is diiwaangelisid, magacaaga wuxuu ku darsamayaa liiska dadka loo oggol yahay inay codeeyaan. Liiska doorashada waa liisto dad ah kuwaas oo ka codeyn kara doorashooyin. Waa inaad kujirtaa liiska dadka loo oggol yahay inay codeeyaan si aad u codeysid.

Waxaad u baahantahay inaad cusbooneysid macluumaadkaaga waqti walboo aad guri ka guurtid.

Hubi inaad haysato ciwaankaaga iimaylka ama lambarkaaga talefanka si aan kaagala hadalno is-diiwaangelinta iyo codbixinta.

Marka ugu horeysa ee aad is-diiwaangeliso ama aad wax ka beddesho tafaasiishaada, waxaan kuu soo diri doonaa warqad ama iimayl si aan u hubino in tafaasiishada ay sax yihiin.



Ma u baahan tahay caawimo si aad isku diiwaangaliso?

Waxaad waydiisan kartaa cid aad taqaan, sida saaxiib ama xubin qoys inay kaa caawiso buuxinta foomkaaga diiwaangelinta, ama inuu foomkaaga kuu buuxiyo.

Waxaad u baahantahay inaad saxiixdo foomka.

Haddii aad garanaysid qof aanan buuxin karin oo aan saxiixi karin foomkiisa diiwaangelinta maadaama uu qabo curyaannimo jireed ama dhimir, waxaa kuu suurtoogaleyso inaad caawisid.



Macluumaad dheeraad ah ma rabtaa?

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangalinta iyo codeynta:

- booqo **vote.nz**
- wac **0800 36 76 56**

Macluumaadka ku saabsan diiwaangalinta iyo codaynta ayaa la heli karaa iyagoo ku qoran luuqado iyo qaabab kale oo badan **vote.nz**

